# Nootaayada Minnesota iyo “Nootaayada” Been Abuurka

Notaries in Minnesota and “Notario” Fraud

## Maxay tahay nootaayo?

Marka qofku noqdo nootaayada, howshoodu waa in ay noqdaan markhaati aan dhinacna u eexan oo ay ka hortagaan in been abuur ama khiyaano la yimaadadaan marka la saxiixayo qoraalada rasmig ah ee muhiimka ah. Marka waraaqaha rasmiga ah loo keeno nootaayada in la saxiixo, nootaayadu waa in ay weydiisaa in ay arkaan aqoonsiga rasmiga ah oo ay saaraan shaabbad rasmi ah dukumeentiga.

Notaayadu ma matalayso in ay markhaati ka tahay xaqiiqada dukumeentigu sheegayso. Waxay markhaati ka noqonayaan saxiixidda waraaqaha rasmiga ah (dukumeentiga), waxayna xaqiijinaysaa in qofka saxiixaya yahay qofkii saxa ahaa.

Ogalaashaha nootaayada waa 5 sanno ah, kadibna waa in la cusboonaysiiyaa.

Waxaad ka keli kartaa faahfaahinta macluumaadka nootaayada iyo sidii looga noqon karo nootayo MN mareegta xoghayaha gobolka. Tag halka https://www.sos.state.mn.us/ ka dib guji halka “Notary and Apostille”*(Nootaayo iyo Caddayn). (ingiriisi kaliya)*

## Yaa noqon kara nootaayo?

Minnesota, qofka ka raba in uu noqdo nootaayo, sidoo kale loo yaqaan “Nootaayada Dadweynaha,” waa in uu ugu yaraan jiraa 18 sanno, waana in uu yahay qof deggan Minnesota. Dadka degan goboladda Iowa, Wisconsin, North Dakota, iyo South Dakota waxay sidoo kale ka dalban karaan nootaayo Minnesota haddii ay qortaan degmo Minnesota ah oo ka xareysan karaan diiwaangelinta nootaayadooda. Qofka nootaayo noqanaya waajib ma aha in uu yahay Mareykan, laakiin waa in uu waddanka si sharci ah ku deganyahay.




Haddii aad buuxiso shardiyada loo baahanyahay, waxaad qoranaysaa arji, waxaadna bixinaysaa kharajka arjiga. Minnesota uma baahna fasallo gaar ah iyo tababar midna, laakiin qofk kasta oo raba in uu fasallo qaato waa u furrantahay. Marka uu xafiiska Xoghayaha Gobolku aqbalo arjiga, qofkaasi wuxuu noqonayaa nootaayo. Qofku waa khasab inuu isaga diiwaangeliyo sidii nootaayaale ahaan oo kale degmadda uu degan yahay. Notaayadu iyada ayaa iibsanaysa shaabadda rasmiga ah ee u gaarka ah, iyo wax kasta oo ay rabaan.

## Maxay notaayada Minnesota samayn kartaa?

- Waxay markhaati ka noqonayaan, oo ay hubinayaan saxiixidaa dukumeentiga muhiimka ah. Marka ay taas sameeyaan waa ay "xaqiijiyeen".
- Waxay maamulayaan dhaarta, sida dhaarinta sarkaal cusub oo la doortay.
- Waxay xaqiijinayaan (ku dhuftaan shaabadda nootaayada) dukumeentiga Gobolka Minnesota.

## Maxaysan samayn karin nootaayada Minnesota?

- Kuma siin karto talin sharci ah ama la talin sharci ah, kuguma matali karo maxkamad, mana samayn karto wax kasta oo loogu tala galay in uu qobto qof loo tababaray, ruqsadna (shatina) loo siiyay in uu garyaqaan noqdo.
- Ma diyaarin karto dukumeenti in la raaco (la rabo in la fuliyo) ah oo sharic ah.
- Wax ka badan $5 oo adeeg ah ma qaadan karaan.
- Waxay xaqiijiyaan (nooteeyaan) warqadohooda rasmiga ah (dukumeenti) oo keliya ama dukumiintiyadda xilihiisa
- Ma xaqiijin karaan (nootaayada) meel ka baxsan Gobolka Minnesota

## Xagee ka heli karaa nootaayo

Inta badan bangiyadu si lacag la'aan ah ah ayay ku sameeyaan adeega nootaayada. Mararka qaarkood haddii aan xisaab kaaga furnayn waxay kaa qaadayaan kharash yar. Qaar ka mid ah goobaha UPS waxay leeyihiin nootaayo. Waxaa wanaagsan marka hore in aad wacdo ama aad u baarto si xiriir ah (online).

Waxaad ka heli kartaa baar nootaayo barta internetka. Soo booqoTag halka https://www.sos.state.mn.us/ oo Guji halka "Notary and Apostille" *(Nootaayo iyo Caddayn),* ka dib guji halka "Find a Notary" *(Raadi Nootaayo).* U kala shaandheey (kala saar) magacyad, magaalada, iyo waddanka. *(ingiriisi kaliya)*

## Nootaayo LAMA mid aha "nootaariyo (notarion)"



Marka la joogo Mareykanka nootaayo LAMA mid aha "nootaariyo" sida looga yaqaan wadamada ku hadla afka Isbaanishka. Wadamada Hisbaaniga ku hadla Nootaariyo "Notarios Públicos" waa qof la taba baray oo ah xirfadle sharci yaqaan ah oo inta badan bixin kara la talin sharci ah, oo diyaarin kara dukumeenti sharci ah. Mareykanka gudihiisa Nootaayo ama nootaayo dadweyne waxa keliya oo ay samayn kartaa waa in ay markhaati ka noqotaa saxiix, inta badanna ma laha tababar rasmi ah.

Gudahaha Mareykanka qof kasta oo sheeganaya nootaariyo dadweyne “notario público” KAAMA caawimi karo dhibaato (mushkilad) la xiriirta sharciga, oo ay ka mid tahay sharciga aad waddanka ku joogtid, ama arrimaha qoyska.

Ameerika gudeheeda waa sharci darro in nootaariyo “ notarios”, xitaa sharci yaqaan aan haysan ruqsad (shati) in uu bixiyo la talin ku saabsan arrimaha sharciga aad waddanka ku joogtid. Xitaa buuxinta foomamka waxaa keliya oo samayn kara waa sharci yaqaan ama wakiil awood loo siiyay oo haysta ogolaasho Mareykanka gudihiisa ah.

## Iska ilaali in ay ku khiyaamaan Nootaariyo “notarios”

- Ha ugu tegin la talin sharci xafiis nootaariyo (notarios).
- Notaariyo (Notarios) inta badan waxay bar timaameedsadaan jaaliyadda soo galootiga ah ( bulshada qaxootiga ah) oo baahi u qaba adeegyada la talinta sharciga ay waddanka ku joogaan. Sharci ma aha in ay sidaas ku sameeyaan gudaha Mareykanka.
- Haddii qof ku yiraahdo waxaan kaa caawimayaa sharciga la xiriira dacwadaada, weydii in uu ku tuso kaarka ururka sharci yaqaannada ee uu ka mid yahay, ama lambarka ruqsada sharci yaqaan. Sharci yaqaanada ka hawl gala Minnesota oo dhan way haystaa kaarkaas.
- Ha siin nootaayo wax ka badan $5 ee dukumeentiga ay kuu sameeyeen. Sharci ahaan $5 waa qiimaha ugu badan ee adeeg ahaan u qaataan. Qaar badan oo ka mid ah waxay ku sameeyaan lacag la’aan.

Haddii aad u baahantahay caawimo tag www.lawhelpmn.org/so ama www.mnbar.org si aad u hesho caawimo sharci oo qiime jaban ah ama lacag la’aan ah ama si laguugu diro garyaqaan khaas ah.

## Dacwad cabasho oo lid ku ah ma ka qori karaa nootaayo ama nootaariyo?

Haa. Waxaad barta internetka ku soo gudbin kartaa Waaxda Ganacsiga ee Minnesota dacwad cabasho oo lid ku ah nootaayo ama nootaario kartaa falal la xiriira dhaqan fool xun ama ka cabasho khiyaamo oo ay ku kaceen nootaayo ama nootaariyo.



Tag halka https://mn.gov/commerce/

→ Guji halka “Consumers” *(macaamiisha)* taxda kor ku taal

→ Guji halka “File a Complaint” *(Dacwad Cabasho)*

Waxaa kale oo jira khad telefoonka oo cabashada lagu soo gudbin karo 651-539-1600 ama 1-800-657-3602.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**